

Scarlet Fever (Somali)

Qandhada loo yaqaan scarlet ee ku dhacda carruurta



Qandhada loo yaqaan scarlet waa infekshan bakteeriyo ah oo keena cune xanuun iyo mararka qaarkood finan maqaarka ah. Calaamadaha lagu garto waxay soo baxaan marka bakteeriyadu sii deyso sunta ku faafta dhiigga oo dhan.

Calaamadaha xanuunka



Qandho



Cune xanuun, ama cunaha oo gaduud noqda



Finan ka soo bilowda madaxa iyo luqunta oo ku faafa jirka, gacmaha iyo lugaha. Waxay soo baxaan 24-48 saacadood gudahood waxayna ku baaba'aysaa 3-4 maalmood gudahood.



Waxaad dareemeysaa inuu maqaarku yahay rough oo kale, sida warqad isku jajaban (sandpaper) oo kale. Waxaa laga yaabaa in maqaarku fiiqmo (sida gubashada qorraxda) marka finanku ay sii yaraanayaan, oo badanaa waxay ku dhacaan gacmaha, cagaha ama meelaha xafaayaddu daboosho ama meelaha gumaarka.



Maqaarku wuxuu u ekaadaa mid baro-baro gaduudan leh kuwaas oo isu badala cadaa markii la tuujiyo



Carrabka gaduudan oo leh kuuskuus, waxa laga yaabaa inuu u ekaado strawberry camal



Baro cadcad oo kasoo baxa darbiga dambe ee cunaha



Qanjirada qoorta oo barara

Daawaynta

Qandhada loo yaqaan scarlett fever waxaa ogaan karo GP-ga markuu baaritaan jireed sameeyo ka dib. Waxa laga yaabaa in GP-ga uu dhuunta qooyaan ka qaado si uu u baaro kabacdina wuu ku ogeysiinayaa haddii baaritaano dheeraad ah loo baahan yahay.

Qandhada loo yaqaan scarlett fever waxaa lagu daaweeyaa antibiyootiga penicillin (kiniini afka laga qaato) muddo 10 maalmood ah. Waxay qaadan kartaa ilaa 48 in qofku uu kasoo roonaado calaamadaha jirrada.



Haddii aan la daweyn, qandhada scarlett fever waxay keeni kartaa dhibaatooyin halis ah sida acute rheumatic fever - oo ah cudur ku dhici kara wadnaha, kala goysyada, maskaxda iyo maqaarka - taas oo keeni karta cudurrada wadnaha ee rheumatic (waxyeello soo gaarta wadnaha). Taasi waa dhibaato aan badanaa dhicin balse halis ah sidaa awgeed waxa muhiim u ah ilmahaaga inay dhammeeysto daawada uu GP-ga u qoray.

Daryeelka guriga

Xaqiiji in ilmahaagu helo nasasho badan oo sii paracetamol (Panadol ama Dymadon) iyo ibuprofen (Nurofen) si uga caawiyaan maaraynta xanuunka ama qandhada. Raac tilmaamaha ku yaal dhalada ama xirmada ay daawada ku jirto si aad u ogaatid qiyaasta saxda ah. Ha siin wax ka badan inta lagu taliyay in la siiyo maalintii.

Sii ilmahaaga cabitaano sonkor leh sida casiirka (juice), caanaha ama elektrolytka (waxaa laga heli karaa farmashiyaha xaafaddaada). Haddii ilmahaagu uu cabayo wax ku filan, kaadidooda waxay noqon doontaa midab jaale khafiif ah.

Ilmahaagu wuxuu u baahan doonaa inuu bilaabo antibiyootiga in ka badan 2 maalmood ka hor inta uusan ku laaban iskuulka ama xanaanada carruurta. Markay xaaladoodu soo fiicnaato, way ku noqon karaan iskuulka ama xanaanada carruurta.

Waa muhiim inaad dhaqdo gacmahaaga / gacmaha ilmahaaga iyo shay kasta oo ilmahaagu u isticmaalo wax-cunista iyo cabbitaanka si looga hortago faafidda caabuqa.

Wixii talo caafimaad ah oo aan degdeg ahayn, wac 13 HEALTH (13 43 25 84) si aad ula hadasho kalkaaliso diiwaangashan 24 saacadood maalintii, todobada maalmood ee wiiggii qiimaha wicitaankana wuxuu la mid yahay adoo xaafada aad degan tahay wacaayo oo kale.



Weydiiso turjubaan haddii aad mid u baahan tahay.

Goorta loo baahan yahay in la arko dhakhtar

U tag GP-ga haddii ilmahaagu:

- uu dareemayo xanuun, inkastoo uu qaadanayo paracetamol ama ibuprofen
- uusan rabin inuu wax cabo
- uunan wax badan kaadineyn
- aysan xaaladiisu kasoo roonaanayn

Waxaa soo saartay Waaxda Gurmada Degdegga ah, Isbitaalka Carruurta ee Queensland. Waxaan qiraynaa talooyinka macaamiisha iyo daryeelayaasha. **Resource ID:** FS355. **Reviewed:** July 2022

Cudur-daar: Macluumaadkan waxaa soo saaray xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyadoo ujeedaduna tahay in loo isticmaalo tilmaame kaliya waxaana loogu talagalay in lagu taageero, balse aysan beddelin, wadhadalka dhakhtarka ilmahaaga ama xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Macluumaadka si joogto ah ayaa loo cusboonaysiiyaa, markaa fadlan hubi inaad tixraacayso nuqulkii ugu dambeeyay. Raadso la-talin caafimaad, ee markaas ku habboon, walaacyada ku saabsan caafimaadka ilmahaaga.